

KALAMIDIYA

Kalamidiyadu waa cudur lagu kala qaado galmada, marka ay istaabtaan xubnaha galmada ama xubnaha galmada iyo xuubka afka ama futada. Infekshinkan waxaa keena bagteri ka hela xuubka xaakada ee xubnaha galmada, kaadimmareenka iyo futada.

Kan wuxuu xataa keeni karaa infekshen ku dhaca xuubka xaakada indhaha.

Cinjirka raggu gashto (kondom) oo si sax ah loo isticmaalo wuxuu ka hortagayaa qaadista cudurka, cinjirkaas waa in la xirnaadaa inta ay galmadu socoto oo dhan.

CALAAMADAHA

Dadka ay ku dhacday kalamidiyada badankood ma gartaan wax xanuun ah, sidaas darteed dadku ma oga inay qabaan cudurka. Cudurka kalamidiyada waxaa la qabi karaa wakhti dheer iyadoo aan la ogaan, laga yaabee dhowr sano. Cudur kalamidiyo ah oo hadda la ogaaday macnaheedu ma ah in qofkaasi uu hadda gogoldhaaf sameeyay.

Ragga iyo dumarkaba waxay dareemi karaan olol marka ay kaadinayaan, kaasoo si sahal ah loogu khaldi karo caallirka kaadihista oo ku badan dumarka dhallintayar, laakiin dhif ku ah ragga dhallinyarada ah. Marar dhif ah bay kalamidiyadu keeni kartaa xubno xanuun.

Dumarka waxaa xataa ku dhici kara isbeddel ku yimaada dhacaannada ka yimaada oo waxay heli karaan dhiigbax yar oo yimaada marka la isu galmoonayo am a inta u dhaxeeyso caadooyinka. Bagteeriga kalamidiyada wuxuu ku faafi karaa marinka ugxaanta oo uu keeni karo infekshen, kaasoo isagana markiisa keeni kara madhaleysnimo iyo cudurro joogto ah ee xaga hoos ku dhaca. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in dhaqso loo ogaado cudurrka si loo daaweeyo. Calaamadaha lagu garto inuu ku fiday marinka ugxaanta waa xanuun laga dareemo qeybta hoose ee caloosha iyo qandho. Marka la dareemo calaamadahaas waxaa qumman in si dhaqso ah loo daweeyo.

Haddii qof dumar ah ay qabto kalamidiya marka ay foolaneyso, waxay qaadsiin kartaa ilmaha oo waxaa ku dhacaya caallirka indhaha ama caallirka sanbabaha.

Raggu waxaa ku dhici kara olol iyo dhacaan ka yimaada kaadimmareenka, firiiric ka soo baxa madaxa xubinta galmada iyo xannuun yar oo laga dareemo dhuunta xubinta galmada. Haddii bakateeriga kalamidiyada uu ku fido kiishka shahwada, wuxuu infekshen u keeni karaa xaniin yaha oo aad u xanuuna, guduuta oo barara.

BAARITAANKA

Tijaabooyinka la sameeyo si loo ogaado Kalamidiyada waxaa lagu qaadaa qori cudbi wata oo la mariyo dhuunta kaadimmareenka iyo dhuunta ilmogaleenka. Kalamidiya waxaa lagu ogaan karaa xataa tijaabada kaadida. Tanna waa hab baaritaan oo haatan laga bilaabay meelo badan.

Dhammaan dadka qaba calaamado u eg kuwa Kalamidiyada waxaa qumman in la baaro. Waxaa intaas dheer inay qumman tahay in dhammaan dumarka iyo ragga dhalintayar la baaraa marka ay yeesheen saaxiib cusub oo ka danbeeyay baaritaankii hore ee Kalamidiyada.

DAWEEYNTA

Kalamidiya waxaa lagu daweeeyaa Antibiyootiko. Qofku waa inuusan u galmoon qof kale inta ay socoto daawadu iyo hal wiig keddib marka ay dawada dhammaato.

Waxaa lagu talinayaa in la kontoroolo dhawr wiig keddib marka ay dhammaatay daweynta.

BAARITAAN IYO DAWEEYN BILAASH AH

Kalamidiyada waxaa lagu magacaabay sida cudur la iskaqaado ee guud ahaan khatar ah, sida uu qabo sharciga maadinta isqaadsiinta. Tan waxaa ku hoos jira xaqa ah bilaash ku baaridda iyo ku daweeyn. Waa muhiim in la wargeliyo saaxiibkaaga hadda iyo kii horeba oo loo sheego in cudurka la qaaday.

Takhtarka iyo qofka buka waa iney ka wada shaqeyaan iney raadraacaan cudurka iyadoo ay dantu tahay in la baaro oo la daweeyo ciddii lala yeeshay xiriir galmo oo laga yaabo in la qaadsiiyay.